

# **Kaalay Kana Soo Qeybgal Kulanka Nashaqada Dugsiga Sarre ee Jefferson**

**Khamiis, Juun 15<sup>th</sup> 5:00p.m. ilaa 7:00p.m.**

## **Makhaayada Jefferson**

### **Bulshada Qaaliga ah ee Dugsiga Sarre Jefferson,**

Fadlan nagala soo qeybgal Kulanka Kooxda La-talinta Nashqada oo dhici doona maalinta Khamiista, Juun 15keeda, iyada oo shirku markiiba bilaabmaya saacadu marka ay tahay 5:00p.m. ilaa 7:00p.m, kana dhici doono makhaayada Jefferson.

Waxaa jiri doonta koox kooban oo ka shaqeyneysa si loogu oggolaado xubnaha dadweynaha iyo Kooxda La-talinta Naqshada(DAG) fursada ay ku wada hadlaan iyo waliba inay ka soo jawaab celiyaan waxyaabihii ugu dambeeyey ee mashruuca Dugsiga Sarre Jefferson iyo fikradihii kala duwanee ku saabsanaa nashqada. Kuwaasi waxaa ka mid ah mawduucyda ay ka mid yihii naqshadaynta dhismaha ee bannaanka,qaabeynta qorshaha dhulka, naqshada qurxinta dhulka, calaamadaha, naqshada sawirada darbiga/rakibaada farshaxanka, doorashooyinka qalabka fasalada iyo xafiisyada la dhigayo iyo midabyada rinjiga.

### **Waa la soo dhaweynayaa dhammaan aragtiyaha**

Iyada oo si buuxda loo aqoonsan yahay taariikhda sinnaan la'aanta magaalada Portland, gaar ahaan arrinta la xiriirta dadaalada dib u deegaameynta darisyada taariikhiga ee madowga ah, PPS waxaa ka go'an inay xaqijiso in dhammaan la dhageysto aragtiyaha bulshada si mashruucani muhiimka ahi hore ugu socda. Kooxda mashruucu waxay qiimeynayaan jawaab-celintiina iyada oo aan rajeyneyno inaan war idinka heli doono.

### **Link-yada macluumaadka dheeraadka ah**

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan mashruuca fadlan waxaad booqataa

<https://www.pps.net/JeffersonBond>. Waxaad sidoo kale wixii su'aalo ah weydiin kartaa ama aad la wadaagi kartaa fikradihiina Kooxda Mashruuca idinka kala xiriiraya halkan [JHSBond@pps.net](mailto:JHSBond@pps.net). Waaan idiinka mahadcelinayaan taageerada aad na siineysaan sidii aad u dhisi lahayn Dugsiga Sarre Jefferson oo cusub lana jaanqaadaya qarniga 21<sup>naad</sup>.